

Ujeeddada, Hawlgalka iyo Xeerarla la Raacayo ee Hirgelin Lagu Bedalayo Xabsiyada Mudada Gaaban ee Carruurta aan Qaangaarka Aheyn ee Ramsey County

Hawlgal

In la hagaajiyo nabadgelyada guud iyo natiijooyinka waqtiga dheer ee carruurta aan qaangaarka aheyn ee Ramsey County iyadoo:

- La dhimayo caddadka carruurta aan qaangaarka aheyn ee lagu hayo xabsiga mudada gaaban ah;
- La baabi'inayo tirada xad dhaafka ah ee carruurta aan caddaanka aheyn ee ku jirta xabsiyada mudada gaaban, tiradaasoo aad uga badan marka loo barbardhigo tan carruurta aan qaangaadhka aheyn ee caddaanka ah;
- La hirgelinayo isbedel nidaamsan oo lagu sameeyo sida loola dhaqmo carruurta aan qaangaarka aheyn ee ku jirta xabsiyada mudada gaaban; iyo in
- La sameeynayo meelo kale oo haboon waxtarna leh oo loogu tala galay carruurta aan qaangaarka aheyn kuwaasoo looga maarmi karo in lagu hayo xarumaha xabsiyada mudada kooban.

Ujeeddada Xarumaha Xabsiyada Mudada Kooban

Iyadoo la raacayo Ramsey County Risk Assessment Instrument (RAI), Ramsey County waxay isticmaali doontaa meelo ammaan ah oo loogu tala galay carruurta aan qaangaarka aheyn ee galay dambiyo sharci jebin ah haddana khatar ugu jira inay:

- Mar kale fal sameeyaan ka hor inta aan la gaarin taariikhda maxkamadda soo socota ay leeyihiin.
- Ku guuldareystaan tegitaanka maxkamadda.

Xeerarka la Raacayo

Ujeedooyinka xudunta u ah nidaamka cadaaladda carruurta aan qaangaarka aheyn waa in sare loo qaado nabadgelyada guud iyo in la dhimo dambigalka carruurta aan qaangaarka aheyn iyadoo la hirgelinayo mas'uuliyad ku saleysan xil-qaadasho shaqsiyadeed. Ujeedooyinkan waa in lagu sameeyaa siyaabo cadaalad ah, waana in la aqoonsado dabeecadaha gaarka ah iyo baahida carruurta aan qaangaarka aheyn.

Carruurta aan qaangaarka aheyn ee sharciga jabiya waa in lagula xisaabtamaa. Hase yeeshee, xiritaan aan muhiim aheyn oo la sameeyo ayaa waxay muujinayaan inay gaarsiiyeen dhaawac dheeraad ah carruurta aan qaangaarka aheyn taasoo keenta in kharash weyn dusha ka fuulo shacabka iyo nabadgelyada dadweynaha. Nidaamyo kale oo ku salaysan bulshada dhexdeeda waxtarna leh ayaa muhiim ah si sare loogu qaado loona hormariyo nabadgelyada guud isla markaana guul looga gaaro natiijooyin kuwan ka wanaagsan oo ay helaan carruurta aan qaangaarka aheyn.

Si loo hubiyo in xarumaha xabsiyada mudada gaaban la isticmaalo marka ay munaasib tahay oo kaliya, waxaa jira baahi muhiim ah oo la rabo in waxyaalo kale loo hirgeliyo carruurta aan qaangaarka aheyn ee khatar deg deg ah ku jira kuwaasoo aan baqdin looga qabin inay dembigii mar kale galaan. Mudnaanta hirgelintan ayaa ah in waxyaalo kale loo sameeyo carruurta sida xarumo kale oo ammaan ah (sida gabaadyo ay shaqaaluhu ammaankooda dhowraan) haddii loo baahdo.

Ramsey County JDAI waa hirgelin isku taxluujinaysa in la tirtiro eexda iyo in la hubiyo in dhammaan carruurta aan qaangaarka aheyn ee ku jirta nidaamka cadaaladda ee carruurta aan qaangaarka aheyn loola dhaqmo si cadaalad iyo sinaan ah--- iyadoon loo eegayn sinjiga, asalka, jinsiga, qowmiyadda asal ahaaneed, rabitaanka xiriirka galmada, diinta, xaalada dhaqaale iyo awooda habdhiska jirkooda intaba.

In dhamaan nidaamka balaaran ee cadaaladda carruurta aan qaangaarka aheyn si guud macluumaad looga ururiyo kadibna si adag loo falanqeeyo waa bartamaha ujeeddadayada. Waa muhiim in la hubiyo isbedel waara, la baaro hab la dhaqanka kala duwan iyo in la tirtiro sinaan la'aanta ka jirta nidaamka.

Hirgelintani ma guulaysan karto haddii aanay jirin ka-qaybqaadashada iyo ku hawlanaanta firfircoon ee qoysaska iyo bulshada wax ku leh. Lahaanshaha iyo is-waafaqa dhamaan dadka wax ku leh waxay fure u tahay: in nidaamka isbedelka lagu sameynayo uu shaqeeyo; in la kobciyo isbedel wanaagsan ee ku dhaca habdhaqanka carruurta aan qaangaarka aheyn; iyo in sare loo qaado fursadaha carruurta aan qaangaarka aheyn si ay ugu koraan bulshada.